

Patientinformation på somaliska

Patientinformation pre-op tvätt_somaliska

Tirada bakteeriyada maqaarka waa in la yareeyo si looga hortago halista caabuqa (ekfashinka). Waa inaad sidaas darteed ku qobaysatid saabuunta bakteeriyada disha, Descutan® ama Hibiscrub®, taas oo laga gadan karo farmashiyaha iyadoo uusan dhakhtar qorin.

Maalinta ka horraysa maalinta qalliinka waa inaad qobaysatid labo jeer. Iska saar/tirtir waxyaalaha la isku qurxiyo (makeup), midabka ciddiyaha, waxyaalaha la gashado ee la isku qurxiyo (dahabka/qalinka) iyo kuwa jirka inta la dalooliyo la geliyo qobayska koowaad ka hor ha na isticmaalin illaa iyo qalliinka kaddib.

1. Qobayska koowaad, waxaan soo jeedinaynaa in la qobaysto subaxdii, waa in saabuun caadiya oo dareere ah lagu qobaysto. Jirka oo dhanna la dhaqo.
2. Qobayska labaad, waxaan soo jeedinaynaa in habeenkii la qobaysto, waxaana lagu qobaysanayaa saabuunta bakteeriyada disha.

Sidaan samee:

- Jirka qoo kaddibna xir tuubada qobayska.
- Jirka oo dhan saabuun mari. Ka bilow madaxa oo dhaq illaa jirka hoose. Si fiican u dhaq sanko, kilkilaha, xudunta, gool-jilicaha iyo xubinta taranka. Ha marin indhaha iyo daloolka maqalka ee dhegta!
- Iska biyo raaci isla markaana mar kale saabuun mari jirka. Habkaas labada jeer saabuunta la marsanayo waxaa loogu yeeraa qobayska labanlaabka ah.
- Kusoo gabogabee inaad si taxadar leh iskaga biyo raacisid oo iskaga qallajisid shukumaan nadiif ah, gasho dhar nadiif ah oo ku seexo sariir lagu goglay dhar sariireed nadiif ah.
- Ha isticmaalin saabuun caadi ah, shaambo, dubbo shaambo iyo waxyaabaha maqaarka la mariyo markii aad saabuunta bakteeriyada disha ku qobaysatid.

Maalinta qalliinka subaxdeeda, inta aadan guriga kasoo bixin ka hor, waa inaad mar kale labo jeer ku qobaysatid saabuunta bakteeriyada disha.

- Haddii madaxa ama agagaarka cunaha lagaa qalayo waa in timaha lagu dhaqo saabuunta bakteeriyada disha labada qobaysba. Qalliimada kale waxaa ku filan hal mar in lagu qobaysto.
- Ha isticmaalin barafuun ama caraf kale oo culus.
- Iska ilaali inaad isticmaashid dhalada isha birteeda la gelayo maalinta qalliinka.

Jooji qobayska haddii saabuunta bakteeriyada disha maqaarku dhibsado.

Haddii loo baahan yahay in timaha laga xiiro meesha la qalayo waxaa taas la sameeyaa maalinta qalliinka oo waxaa lagu xiiraa mashiin lagu xiirto oo daryeelka caafimaadka loogu talo galay. Adigu ha samayn!